

Xafiiska ajnabiga ee agaaladda Turku
somali

27.11.2020

Macmiilka cusub ee xafiiska ajnabiga

Xafiiska ajnabiga adeegyadiisa waxaa loogu talagalay adiga, haddii

- aad daganeyd Finland saddex sano in ka yar
- aad tahay qof asalkiisii hore qaxooti ahaa oo dadka dalka u soo guurey

Xafiiska ajnabigu wuxuu ku yaalaa xarunta dhexe ee arrimaha bulshada magaaladda Turku:

Linnankatu 23, dabaqa 6:aad
20100 Turku.

Xafiiska ajnabiga bartiisa warbixinta (info) waxay furan tahay isniin ilaa jimce saacadaha 9–10. Markaad imaneysid marka kuugu horeysa, iska soo wargeli infoda. **Soona qaado saddexdan macluumaad: aqoonsigaaga, go'aanka sharcigaaga iyo heshiiska kirada gurigaaga.**

Barta infoda ayaad kuu qabaneysa ballan, markaas ka dib ayaad la kulmeysaa hagahayaga. Kullanka waxa lagu qabanayaa turjubaan. Hagahayaga ayaa ku dhagaysanaya kuna siinaya tilmaan iyo talo bixinba. Kullanka hagaha ka dib waxaa lagu qabanayaa ballan kale oo aad kula kulmeysid shaqaalaha arrimaha bulshada. Kullankaasna shaqaalaha arrimaha bulshada ayaad kala xaajoon doontaa si wadajir ahna ugala heshiin doontaa, adeegyada aad u baahan tahay.

Sidoo kale kalkaalisada sare caafimaadka ayaa kullan kuugu baaqi doonta, halkaas oo caafimaadkaaga lagu baadhi doono. Haddii aad u baahatid dhakhtar iyo/ ama cilmi nafsi yaqaan, waxaad ballantooda ka heleysaa kalkaalisada sare caafimaadka.